



WASHINGTON

Waaxda Caafimaadka ee Gobolka
Kaaliyaha Daryeelka Guriga Shahaadada leh

ee Guriga

Laga Bilaabo Maarso 4, 2025

Waxa daabacay Prometric

Bixiya Imtixaanada Shatiyada ee Gobolka Washington

Copyright© 2024 Prometric LLC
La Naqtiimay 01272025

Mawduucyada

Hordhaca	1
Fariin ka Socda DOH iyo Prometric.....	1
Milicsasho	1
Nidaamka Codsiga Imtixaanka	2
Goobaha Imtixaanka	2
Goob imtixaan xarun ku taalla	2
Goob imtixaan gobol.....	2
Kormeerka Khadka Tooska ah.....	2
Macluumaadka khidmadda	3
Imkaaniyaadka Imtixaanada Khaaska ah	3
Dibu qabsashada Ballanta	4
Guudmarka Imtixaanka	4
Imtixaanka Aqoonta	4
Guudmarka Meelaha Imtixaanka Koobsanayo ..	5
Guudmarka Meelaha Imtixaanka Aqoontu Koobsanayo.....	5
Imtixaanka Xirfadaha	5
Tartamayaasha metelaya doorka macmiilka	6
Gelista Imtixaankaaga	7
Waxyaabaha aad u soo qaadanayso Imtixaanka	7
Shuruucda Xarunta Imtixaanka	8
Natijoyinka Imtixaankaaga	9
Imtixaanka aqoonta	9
Imtixaanka xirfadaha	9
Dibu eegista Imtixaanka Aqoonta	9
Nidaamka Racfaanada	9

Fariin ka Socda DOH iyo Prometric

Sharciga gobolka Washington wuxu shaqaalaha daryeelka muddada dheer qaarkood ku waajibanayaa inay qaataan shahaadada kaaliyaha daryeelka guriga. Waaxda Caafimaadka ee Gobolka Washington (Department of Health, DOH) ayaa ka masuul kormeerka imtixaan qaadista iyo shahaado siinta tartamayaasha ku gudba imtixaanka

DOH waxay qandaraas la gashay Prometric Inc., si ay u bixiyaan imtixaanka Shahaadiga ah ee Kaaliyaha Daryeelka Guriga (Home Care Aide, HCA) ee Gobolka Washington. Dukumeentigani wuxu sharraxayaa habraaca isdiiwaangelinta iyo qaadashada imtixaanka HCA.

CODSIGA IMTIXAANKA

CODSADAYAASHU WAA INAY KEENAAN CINWAAN IIMAYL SI BALLAN IMTIXAAN LOOGU QABTO.

Imtixaankii qoraalka ahaa iyo ka hadalka ahaa waa la isku daray oo waxa laga dhigay hal imtixaan Aqooneed; dhammaan tartamayaashu waxay mari doonaan imtixaan hadal ah markay tijaabada marayaan. Imtixaan aqooneedku inta badan waa su'aalo run/been ah oo ay la socdaan waxoogaa sawirro ah iyo muuqaallo gaagaaban.

Codsigii shahaadada DOH iyo codsiyadii imtixaanka ee Prometric waa la isku daray oo waxa laga dhigay hal foom codsi. Dadka markii u horraysay imtixaanka u fadhiisanaya waxay codsiyadooda u diri doonaan Waaxda Caafimaadka (DOH), oo iyana u soo gudbin doonta Prometric haddii codsadu u qalmo imtixaanka. Tartamayaashu waxay iimayl wata tilmaamaha qabsashada ballanta imtixaanka iyo bixinta khidmadaha imtixaanka ka heli doonaan Prometric. Si aad u gasho websaydka DOH iyo codsiga, ku dhufo **halkan**.

Dhammaan dadka imtixaanada dib u galayaa waxay imtixaanka ka codsan karaan, khidmadda ku bixin karaan oo ballantana ka qabsan karaan Prometric iyagoo u maraya barta Musharixiinta Prometric ee laga helayo halkan <http://www.prometric.com/wadoh>

Milicsasho



Raac tallaabooyinkan haddii aad rabto inaad gasho imtixaanka HCA:

Si aad u gasho imtixaanka HCA oo u hesho shahaadada

- 1 Foomka **Codsiga Kaaliyaha Daryeelka Guriga** oo aad soo buuxisay u soo dir DOH.
- 2 Isticmaal xogta lagu soo bandhigay hagahan si aad ugu diyaargarawdo imtixaankaaga.
- 3 Gal imtixaanka qorsheysan. Hubso inaad aqoonsigii loo baahnaa u soo qaadato goobta imtixaanka.
- 4 Haddii aad ku gudubto imtixaanka oo buuxiso dhammaan shuruudaha kale shatiga, DOH waxay ku siin doontaa shahaadada.
- 5 Haddii ku dhacdo imtixaanka shuruudda ah, la xiriir Prometric si aad ballan imtixaan oo kale u qabsato.

Si aad u hesho jawaabo aan lagu sheegin dukumeentigan

Prometric kala xiriir wixii su'aalo iyo macluumaad codsasho ah ee ku saabsan nidaamka imtixaanka:

Prometric

7941 Corporate Drive

Nottingham, MD 21236

Taleefan: 800.324.4689

Iimayl: WAHCA@prometric.com

Websayd: www.prometric.com/wadoh

Su'aalaha shaahadada iyo shatiyada la xiriira kala xidhiidh DOH:

Waaxda Caafimaadka ee Gobolka Washington

Qaybta Hubinta Tayada Nidaamyada

Xafiiska Adeega Macmiilka

111 Israel Road SE

P.O. Box 47877

Olympia, WA 98504-7877

Taleefan: 360.236.4700

Iimayl: Hmccreview@doh.wa.gov

Websayd: [Macluumaadka Shati-siinta Kaaliyaha Daryeelka Guriga Lagu Bixiyo](#) | [Washington State Department of Health](#)

Nidaamka Codsiga Imtixaanka

Qaybtani waxay ka hadlaysaa:

- Shuruudaha loo baahan yahay si aad ugu qalanto imtixaanka Shahaadiga ah ee HCA.
- Macluumaad ku saabsan sida loo buuxiyo foomka codsiga.
- Macluumaad ku saabsan sida dib loogu qabsado ballanta imtixaanka.

Imtixaan-gelayaasha Marka Koobaad: Dhammaystir [codsiga](#) dabadeed ku soo laabo DOH sida tilmaamaha codsiga kuu sheegayaan. Prometric ayaa iimayl ahaan kuugu soo wargelin doonta marka lagu ansixiyo inaad gasho imtixaanka kuna siin diinto tilmaamo dheeraad ah.

Dadka imtixaanka dib u gelaya: Haddii aanay kugu waajib ahayn inaad tababar dib u marato, si otomaatig ah ayaa imtixaanka labaad laguugu diiwaangelin doonaa oo waxaad si fudud u soo geli kartaa barta Musharixiinta Prometric si aad u balansato oo aad u bixiso khidmada dib u qaadashada imtixaankaaga. Haddii lagaaga baahdo inaad tababarka dib u maro, waxaad u baahan doontaa inaad soo gudbiso codsi cusub adigoo isticmaalaya bogga Kaaliyaha Daryeelka Guriga ka hor inta aadan awood u yeelin bixinta khidmada imtixaanka iyo qabasashada ballanta imtixaanka.

Goobaha Imtixaanka

Waxaa jira seddex goobood oo suurtoagal ah oo musharixiinta ay ku qaadan karaan imtixaanka.

Goob imtixaan xarun ku taalla

Haddii barnaamijkaaga tababartku bixiyaan goob imtixaanka lagu galo oo xaruntooda ku taalla, waxay ku siin doonaan koodhka imtixaanka goobtooda. Hubso inaad koodhka goobta ku qorto foomka codsiga ee Waaxda Caafimaadka (Department of Health, DOH).

Goob imtixaan gobol

Haddii aad doorato inaad ku qaadato imtixaanka goobta imtixaanka gobolka, hubi inaad koodhka goobta imtixaanka ku qorto foomka codsiga ee DOH.

Kormeerka Khadka Tooska ah

Haddii aad doorato inaad ku qaadato imtixaanka adoo adeegsanaya kormeerka khadka tooska ah, waa inaad buuxisaa shuruudaha kumbiyuutarka, internetka, iyo meesha (imtixaanka guriga, dugsiga, iwm.) Kaliya Imtixaanka Aqoonta ee Ingiriisiga ayaa lagu qaadi karaa meel khadka tooska ah. Imtixaanka xirfadaha iyo Imtixaanka Aqoonta ee aan Ingiriisiga ahayn waxaa lagu qaadaa Goobaha Imtixaanka (In-Facility Testing, IFT).

Qorsheynta Imtixaanadaada

Liiska goobaha imtixaanka Gobolada ayaa ku diyaar ah barta:

<http://www.prometric.com/wadoh>

Marka codsiga iyo bixinta lacagta imtixaanka la dhammaystiro, tartamayaashu waxay awood u yeelan doonaan inay ballan imtixaan ka qabsadaan xarrumaha imtixaanka ee ku habboon taariikh iyo waqti jadwalkooda waafaqaysa. Musharixiinta waxay awoodi doonaan inay ka jadwaleystaan imtixaanka barta Musharixiinta Prometric oo laga helo bartan <http://www.prometric.com/wadoh>

Warqadda aqbalaadda Imtixaanka

Marka imtixaankaaga la jadwaleeyo, waxaad Warqadda aqbalaadda Imtixaanka **ku heli doontaa iimayl ahaan**. Warqaddan waxa ku qornaan doona, waqtiga, taariikhda iyo goobta khaaska ah ee imtixaanku ka dhici doono.

Macluumaadka khidmadda

Macluumaadka khidmadda fadlan booqo www.prometric.com/wadoh

Khidmadaha imtixaanka **lama celin karo meel kalena looma wareejin karo**.

Khidmadaha waa in loo baxsha hababkan soo socda:

- **Jeegaga shaqsiga ah iyo lacagaha naqadka ah lama aqbali doono.**
- Lacagaha waxaa lagu soo gudbin karaa khadka tooska ah ee Barta Musharixiinta Prometric oo laga helo halkan <http://www.prometric.com/wadoh>
- Lacagta waxa la bixin karaa iyadoo la isticmaalo kaararka bangiga ee shaqaynaya sida VISA, MasterCard ama American Express. Prometric way xaqiijin doonaan kaararka bangiga ka hor intaan la gelin hawlaha diiwaangelinta. Dib u dhacyo ayaa dhici kara haddii kaarara bangiga lama xaqiijin karo. Codsiga ansixinta lacagbixinta halmar laga hawlgeli doonaa; haddii la diido, nooc kale oo lacagbixin ah baa loo baahan doonaa.
- Foojarada lacagaha horay loo baxsho

Siyaasadda lacagcelinta Haddii la ogaado in aadan u qalmin dib u imtixaamis, khidmadaha imtixaanka waa la soo celin doonaa.

Imkaaniyaadka Imtixaanada Khaaska ah

Imkaaniyaad imtixaan oo macquul ah ayaa la bixinayaa si tartamayaasha leh naafonimo caddayn leh oo ku xusan Xeerka Naafada Maraykanka (Americans with Disabilities Act, ADA) loo siiyo fursad ay ku muujin karaan xirfadooda iyo aqoontooda.

Ogeysiis hore oo soddon cisho ah ayaa loo baahan yahay si laguugu diyaariyo imtixaan imkaaniyaad khaas ah wata. Natiijada qiimeynta waxa laguugu soo wargelin doonaa ka hor intaan ballanta imtixaanka lagu qaban. Imkaaniyaadkan kuguma soo dallaci doonaan wax kharash dheeraad ah.

Imkaaniyaadka dadka Ingiriisidu tahay Luuqadood Labaad (English as a Second Language, ESL). Haddii Ingiriisidu tahay luqadaada labaad, caqabadaha luuqadaha looma tixgeliyo naafonimo. Hase ahaatee, waxaad dooran kartaa inaad imtixaanada ku gasho Raashiyaan, Isbaanish, Yurkayniyaan, Fiitnaamiis, Kuuriyaan, Shiineys la Fudaydiyay, Soomaali, Samoan, Khmer, Tagalog, Amhaari, Carabi, ama Laoshiyaan. Ikhtiyaarka **waa in** foomka codsiga lagu sii muujiyo ka hor maalinta imtixaanka u qorsheysan. Ma **codsan kartid** inaad imtixaanka ku gasho luuqad kale isla maalinta imtixaanku dhacayo.

Haddii aad jeclaan lahayd inaad imtixaan ku gasho luuqad aan kor ku qornayn, fadlan soo buuxi foomka imkaaniyaadka imtixaanka oo cayin luuqadda aad jeclaan lahayd inaad imtixaanka ku gasho, soo raaci lahjadda, haddii ay jirto. Prometric waxay kuu raadin doontaa turjumaan toos ah si uu kuugu turjumo imtixaanka Aqoonta iyo ka xirfadaha labadaba.

Foomamka Imkaaniyaadka imtixaanka waxa la soo gelin karaa bogga Musharixiinta Prometric ee laga heli karo barta ee <http://www.prometric.com/wadoh> ama waxa boosto ahaan loogu dirayaa:

Barnaamijka Kaaliyaha Daryeelka Guriga

7941 Corporate Drive

Nottingham, MD 21236

Dibu qabsashada Ballanta

Khidmadaha dibu qabsashada ballantu waa sida soo socda:

- **\$35 khidmad ah** marka dib u qabsashada ballantu dhacdo **illaa toban (10) beri** ka hor imtixaankaaga.
- Khidmada imtixaanka oo isku dhan haddii aad ballanta beddesho wax ka yar sagaal (9) beri ka hor imtixaanka, ama haddii lagu diido inaad soo gasho goobta imtixaanka.

Haddii aad habsaanto ama soo daahdo Haddii aad seegto ballantada ama soo daahdo oo lagu diido imtixaanka, waxaad lumin doontaa khidmadaadii oo waa inaad la baxdo khidmad imtixaan oo kale. Haddii ballanta kaga baaqsato jirro ama xaalad degdeg ah, isla markiiba wac Prometric. Waxa laga yaabaa in lagaa dhaafaa khidmada dib u qabsashada ballanta haddii aad keento caddaynta jirrada ama xaaladda degdega ah.

Xidhitaan xaalad degdeg ah. Cimilo adag ama xaalad degdeg ah ayaa keeni kara in la kansalo imtixaankii ballansanaa. Haddii tani dhacdo, Prometric waxay isku dayi doontaa inay taleefan ama iimayl ahaan kugula soo xiriiraan. Waxaad sidoo kale wici kartaa 800.324.4689 si aad u eegto in goobta la xidhay iyo in kale. Haddii goobta xidhanto, imtixaankaaga dib ayaa loo dhigi doona iyada oo aanay jirin khid ballan dibu qabsasho.

Dib u gelista imtixaanka. Waa inaad u fadhiisato oo ku gudubto imtixaanka Xirfadaha iyo ka Aqoonta labadaba oo mid kasta afar isku day leeyahay. Khidmad ayaa laga rabaa marka aad imtixaanka gasho. Waxa laga rabaa inaad qaadata keliya imtixaanka aad ku dhacday marka laga reebo sida hoos lagu xusay.



Xasuusnoow haddii ku dhacdo labada imtixaanka ka dib markaad afar jeer isku daydo, waxaad u baahan doontaa inuu dib kuu soo tababaro barnaamijka kaaliyaha daryeelka guriga oo la ansixiyay intaas ka dib labada imtixaanka dib ayaad u qaadan doontaa.

Imtixaanka Aqoonta

Imtixaanka Shahaadiga ah ee Kaaliyaha Daryeelka Guriga ee Gobolka Washington wuxu isugu jiraan **Imtixaan Aqooneed** iyo bandhigyo shaqooyin gacanta laga qabto oo loogu yedho **imtixaanka Xirfadaha. Waa inaad ku guulaysataa** imtixaanka aqoonta iyo xirfadaha labadaba. Waxaad haysataa ilaa afar isku day. Haddii aad ku guuldareysato mid ka mida Imtixaanka Aqoonta ama Xirfadaha afar jeer, waxaa lagaa rabaa inaad dib u tababarato oo aad dib u qaadata Imtixaanka Aqoonta iyo Xirfadaha labadaba.

Imtixaanka Aqoontu wuxu ka kooban yahay 60 su'aalood oo goobgeli ah kuwaas oo lagu qiimeynayo aqoonta aad u leedahay waajibadyada shadaqada kaaliyaha daryeelka guriga. Waxaad haysan doontaa 90 daqiiqo si aad u dhammeystirto imtixaanka.

Imtixaanka Aqoonta waxaa lagu maamulaa goobta imtixaanka ama iyada oo loo marayo kormeerka khadka tooska ah ee kombiyuutarka. Uma baahnid khibrad kombiyuutarka si aad u qaadata imtixaanka. Waxaad isticmaali doontaa mawka kombiyuutarka si aad u doorato jawaabta. Kahor intaanad bilaabin imtixaanka, waxaad fursad u heli doontaa inaad ka jawaabto dhowr su'aalood oo tusaale ah. Su'aalaha tusaalaha ah ayaa sidoo kale laga heli karaa **halkan**.

Guudmarka Meelaha Imtixaanka Koobsanayo

Meelaha imtixaanka aqoontu koobsanayo ayaa hoos ku qoran.

Guudmarka Meelaha Imtixaanka Aqoontu Koobsanayo

60 su'aalood — 90-daqiigo lagu dhammeynayo

Xasuusnoow:Toban su'aalood oo imtixaankan ku jira ayaa loo adeegsan doona ujeedooyin tirokoob keliya oo aan loo isticmaali doonin nidaamka qiimeynta dhibcaha imtixaanka.

Mawduuca I:

Mansabyada iyo Masuuliyadaha Kaaliyaha Daryeelka Guriga — 38% [19 su'aalood]

- A. Doorarka iyo xuduudaha shaqaalaha
- B. Xuquuqda iyo sharafta macmiilka
- C. Tacaddiga iyo ka soo warbixinta waajibka ah
- D. Fiirsashada iyo ka soo warbixinta
- E. Xirfadaha xiriirka
- F. Dhibaato xallinta
- G. Isdaryeelka Shaqaalaha

Mawduuca II:

Taageerista Fayoqabka Jireed iyo ka Maskaxbulsheed — 44% [22 su'aalood]

- A. Taageeer hawlaha nololaha maalinlaha (activities of daily living, ADL)
- B. Maqaar daryeelis
- C. Cuntada iyo cabbitaanka
- D. Kaalmaynta daawooyinka
- E. Xasaasiyadaha dhaqamada
- F. Caafimaadka iyo fayoqabka
- G. Murugada iyo tiiraanyada

Mawduuca III:

Dhiirigelinta Badqabka — 18% [9 su'aalood]

- A. Xakamaynta Caabuqyada/xanuunada
- B. Cudurada dhiiga raaca iyo Fayraska Daciifiya Difaaca Jidhka Aadamaha (Human Immunodeficiency Virus, HIV)/AYDHISKA (Acquired Immunodeficiency Syndrome, AID)
- C. Ka hortagga Hargabka
- D. Diyaarinta iyo ka shaqaynta cuntada

Imtixaanka Xirfadaha

Imtixaanka Xirfaduhu waa imtixaan waqti loo qabanayo. Waxa lagugu qiimeyn doonaa shan xirfadood. Markaad qabanayso saddexda xirfadood ama hawlahood ee lagu asteeyay, waxa sidoo kale la qiimeyn doonaa laba xirfadood dheeraad ah. — Gacmo-dhaqista iyo Dhaqamada Daryeelka Fiican. Dhaqamada Daryeelka Fiican waa dhaqamo qayb ka ah xirfad kasta, sida xuquuqaha macmiilka, la xiriirista ama la sheekaysiga macmiilka, raaxada iyo badqabka macmiilka, iyo xakamaynta caabuqyada. Si aad ugu gudubto imtixaanka Xirfadaha, waa inaad ku gudubtaa dhammaan shan xirfadood.

Liiska Hubinta Xirfadaha Kaaliyaha Daryeelka Guriga waxa laga heli karaa onlaynka barta www.prometric.com/wadoh. Bilowga imtixaanka Xirfadaha, qiimeeyuhu wuxu ku siin doonaa tilmaamo aad raacayso si aad saddex xirfadood ama hawlahood ugu qabato macmiilka. Qiimeeyaha ayaa kuu sheegi doona waqtiga aad haysato si aad imtixaanka uga shaqeyso iyadoo lagu salaynayo xirfadaha ama hawlaha lagaa dalbaday inaad samayso. Si aad ugu gudubto imtixaank xirfad, lagaama rabo inaad sida ugu fiican u qabato xirfadaha ama hawsha, laakiin waa inaad muujiso inaad xirfada ama hawsha qaban karto. Qiimeeyaha wuu ku daawan doonaa intaad hawsha ama xirfadaha ku jirto oo wuxu waxqabadkaaga barbar dhigi doonaa xaashida qiimeynta xirfadaha.

Shuruudda imtixaanka Xirfadaha waxay kuu ogol yihiin inaad sixitaan sameyso intaad xirfadaha ama hawsha qabanayso. Waa inaad u sheegtaa qiimeeyahaaga inaad sixitaan sameynayso intaad xirfadaha ama hawsha waddo. Marka aad dhammeystirto xirfadaha ee aad qiimeeyaha u sheegto inaad xirfadii ama hawshii dhammeysay, kuma laaban kartid xirfadii aad ka soo gudubtay ama hawshii si aad sixitaan u sameyso. Laguma siin doono waqti dheeraad ah oo sixitaanada ku sameyso. Maadama tijaabadu tahay imtixaankii shahaadiga ah ee gobolka, qiimeeyaha looma ogola inuu tartamayaasha caawiyo, wax barao ama siiyo talooyin ku saabsan qabashada xirfadaha ama hawlaha. Qiimeeyaha sidoo kale looma ogola inuu kaala hadlo natiijooyinkaaga ama heerkaaga waxqabad ee imtixaanka.

Tartamayaasha metelaya doorka macmiilka

Waxaad isticmaali doontaa qof caaga ama macmala markaad u baahan tahay inaad muujiso xirfadahaaga daryeelka kaadi iyo saxaro ka dhiqista iyo/ama xirfadaha daryeelka katiitarka la xiriira. Xirfadaha ama hawlaha intaas ka soo hadhay, tartamayaasha kale ayaa kuu meteli doona doorkii macmiilka. Waxa laga filayaa inaad doorka macmiil u metesho tartame kale oo aad isku maalin imtixaanka gelayaan. Qiimeeyaha ayaa akhrin doonaa tilmaamaha sharraxay doorka qofka macmiilka metelaya ka hor intaan imtixaanku bilaabmin.

Haddii aad qabto xaalad caafimaad oo saameynaysa awoodda aad ku meteli lahayd doorka macmiilka ee xirfad ama hawl, sida haddii aad macaan qabto oo aadan cuni karin khudaar mushakal ah, fadlan u sheeg qiimeeyaha isla maalinta aad imtixaanka u timaado.

Hoos waxa ku qoran sharraxaad kooban oo ku saabsan waxa laga filayo markaad metelayso doorka macmiilka.

Xirfadda ama hawsha la qabanayo	Markaad metalayso doorka macmiilka, waxa aad
Sameynta Dhaqdhaqaaqyo Kala Duwan	ku jiifi doontaa sariir oo waxa jimicsi laguugu sameyn doonaa hal garab, ruug iyo canqaw.
Daryeelka Cagaha	ku fadhiyi doontaa kursi oo waxa lagu dhaqi doonaa hal cag, ciddiyaha ayaa laguugu simi doonaa soofe ciddiyeed, oo wax cagta lagu marin doonaa looshin.
Kaalmeeynta dhar-xirashada	ku fadhiisan doontaa kursi oo waxa adigoo xiran dharkaagii hore lagu gelin doonaa shaadh, sharabaado, hoosgashiyo iyo kabo.
Cunto-siinta macmiilka	ku fadhiisan kursi waxana lagu siin doonaa khudaar mushakal ah waxaa intaas ka dib lagu siin doonaa biyo aad cabto.
Ka kaalmeynta lugaynta	waxa lagu lugaysiin doonaa illaa 20 todobaad.
Rogista iyo boos ka beddelista	ku jiifi doontaa sariir waxana lagu rogi doona dhinac, waxana barkin yar lagu gelin doonaa dhabarka iyo lugahaaga dhexdooda si laguugu taageero.
Xirfadda ama hawsha la qabanayo	Markaad metalayso doorka macmiilka, waxa aad
Nadiifinta iyo xaraynta ilkaha macmalka ah	lagu dhiibi doonaa koobka ilkaha macmalka oo ay ilko macmala horey ugu jireen. Waxaad koobkan u dhiibi doontaa tartamaha. Ilkaha macmalka lama dhex gelin doono afkaaga.
U gelinta macmiilka sharabaad laastiik ah oo illaa ruugga jooga	ku jiifi doontaa sarriir iyadoo tartamuhu ku gelinayo sharabaad illaa ruuga jooga lugahaaga midkood.
Ka soo wareejinta sariir iyo keenista kursi-curyaan	ku jiifi doontaa waxana lagaa caawin doonaa inaad ka soo toosto sariirta, istaagto oo aad u wareegto kursi curyaan.
Bixinta daryeelka nadaafadda afka	ku fadhiyi doontaa kursi iyadoo ilkaha lagu cadayayo.
Bixinta daryeelka ciddiyaha faraha iyo gacmaha	ku fadhiyi doontaa kursi waxana lagu qoyn doonaa ciddiyaha gacmaha, ciddiyaha hoostooda ayaa lagu nadiifin doonaa, waxana ciddiyaha laguugu simi doonaa soofe ciddiyeed. Looshinka maqaarka ayaa sidoo kale gacmaha la marin doonaa.
Ka Caawi macmiil inuu daawo qaato	lagu siin doonaa nacnac loogu talagalay tijaabada loona adeegsanayo inuu daawadii metel u ahaado. Waxa lagu ogol yahay inaad calaashato ama liqdo nacnaca. Nacnacyada la adeegsanayo waxay leeyihiin qaab iyo cabbir la mid ah ka daawooyinka. Waxa lagu ogol yahay inaad iska sii fiiriso dhalooyinka daawada ka hor intaanu imtixaanku bilaabmin.

Gelista Imtixaankaaga

Garashada waxaad filan karto markaad gelayso imtixaankaaga waxay kaa caawin kartaa u diyaar garawgiisa. Qaybtan waxa ku jira:

- Liiska waxyaabaha aad goobta imtixaanka u soo qaadanayso.
- Shuruucda laga dhaqangelin doono goobta imtixaanka.
- Hage kaa caawinaya sidaad u fahmi lahayd natiijoyinkaaga imtixaanka.
- Macluumaad ku saabsan racfaanada.

Waxyaabaha aad u soo qaadanayso Imtixaanka

Waa inaad timaado ugu yaraan **30 daqiiqo ka hor** waqtiga imtixaanku kuu qorsheysan yahay. Tani waxay kuu sahlaysaa inaad hesho waqti aad ku soo gasho goobta oo shaqaaluhu ku hubiyo aqoonsigaaga. Waxaad u baahan tahay inaad bixiso dhammaan waxyaabaha soo socda:

Warqadda aqbalaadda Imtixaanka. Waa inaad keentaa warqadda asalka ah ee Prometric ku soo dirtay soo bandhigtay. Nuqulada lama aqbali doono.

Aqoonsi. Waa inaad keentaa hal foom aqoonsi oo ansax ah ka hor inta aadan imtixaanka marin. Aqoonsigaasi **waa inuu ahaada mid:**

- 1 Ay dowladi bixisay (tusaale leysanka darawalnimo, kaarka aqoonsiga ee gobolku bixiyay, aqoonsi ciidan ama baasaboar) ay ku yaalliin:
 - Sawirka hadda ee qofka
 - Saxiixaaga
 - Magaca toos u waafaqaya magaca aad u adeegsatay codsiga imtixaanka (ay ku jiraan qaybaha sida "Yare" iyo "III").



Muhiim haddii aadan bixin aqoonsi sax ah xilliga imtixaanka, waxa loo tixgelin doonaa inaad ballantii imtixaanka ka baaqsatay. Waxa lagaa rabi doonaa inaad bixiso khidmadii imtixaanka oo isku dhan si aad imtixaan kale u ballansato.

Muhiim Ka hor inta aadan marin imtixaankaaga, waxa lagaa rabaa inaad ka jawaabto su'aal xaqiijin ah oo kombiyuutarka lagu waydiin doono ka hor intaan imtixaanka la bilaabin. Haddii aad aqbalin ama ku raacin su'aasha xaqiijinta ah, laguuma ogolaan doono inaad gasho imtixaanka. Waxa lagu waydiin doonaa inaad si guul leh u soo dhammeysatay koorsadii tababarka si aad imtixaanka ugu fadhiisato. Shaqaalaha goobta imtixaanu waxay xaq u leeyihiin inay tartame kasta u diidi karaan inuu soo galo goobta haddii aqoonsiga uu sito:

- U muuqdo mid been abuur ah ama lagu falaaday.
- Uu ku yaallo sawir aan u muuqan inuu shabbahayo tartamaha imtixaanka gelaya. Fadlan hubi in aqoonsigaaga uu ku yaallo sawir dhowaan laga qaaday.
- Uu ku yaallo saxiix aan waafaqayn midka tartamaha.

Soo daahitaanka. Haddii aad ka soo daahdo ballanataada imtixaanka, laguuma ogolaan doono inaad imtixaanka gasho. Intaas ka dib waa in aad bixiso khidma imtixaan oo kale oo aad qabsato ballan imtixaan oo cusub.

Waxa aad soo xidhanayso. Si aad u gasho imtixaanka xirfadaha, waxa lagaa rabaa inaad sharabaado dhismaha ku dhex xirnaato, wadato kabo buudh ah oo aan siibanayn. Waxa la soo jeedinayaa inaad u soo labbisato qaabkii aad shaqada ku iman lahayd, oo aad soo xidhato dhar badbaado iyo raaxo u leh shaqada aad qabanayso. Waxa laga yaabaa in lagu diido inaad goobta imtixaanka soo gasho haddii aad soo xirato dhar aan habboonayn. Haddii lagu ogolaan waayo inaad imtixaanka gasho, waxaad waayi doontaa khidmadihii imtixaanka waxana aad ku khasbanaan doontaa inaad bixiso khidmad imtixaan oo kale si aad ballan kale oo imtixaan u qabsato.



Xasuusnoow maadaama dhammeystirka labada Imtixaan ee Aqoonta iyo Xirfadaha ay qaadan karto dhow saacadood, waxa lagugula talinayaa inaad soo qaadato cunto fudud iyo/ama qado iyo cabbitaan aanay khamro ku jirin. In kastoo aan cabbitaan iyo cunto kunis la ogolayn inta imtixaanka lagu jiro, waxa lagu tilmaami doonaa meelo lagu ogol yahay inaad wax ku cunto inta aad imtixaanka sugayso. Ha isku hallayn inaad mishiinada wax laga gato ka heli doonto goobta imtixaanka.

Shuruucda Xarunta Imtixaanka

Shuruucdan soo socota ayaa loo hogaansami doonaa goob kasta oo imtixaanka lagu qaadayo. Haddii aadan raacin shuruucdan, waxay sababi doontaa in imtixaanka laga kanasalo. Prometric waxay xaq u leedahay inay cod iyo muuqaal ka duubto kulan imtixaaneed kasta.

- Tixraacyo**
 - Wax dukumeentiyo tixraac, waraaqo ama agab akhris ah lagama ogola xarunta imtixaanka. Haddii lagu qabto adigoo wata agabkaas kor lagu soo sheegay ama wax kale oo ku caawinaya, laguuma ogolaan doono inaad sii wadato imtixaanka jawaabahaagana lama sixi doono.
- Alaabada shaqsiyeed**
 - Prometric kama masuul ah alaabada shaqsiyeed ee lala yimaado xarunta imtixaanka. Waxa lagu talinayaa inaan alaabo shaqsiyeed loo soo qaadan goobta imtixaanka. U fiiri lahoow waxyaabaha soo socda:
 - Qalabka elegtarooniga ah **loomo** ogola aagga imtixaanka. Waxa ka mid ah **taleefanada gacanta**, bayjarada, kamaradaha, aaladaha wax lagu duubo, iwm. Dhammaan alaabtan waxaa soo ururin doona Qiimeeyaha Gargaarka Daryeelka Guriga (Home Care Aide Evaluator, HCAE) ama kormeeraha.
 - Alaabada shakhsiyeed ee kale — boorsooyinka gacanta, shandado, iwm. — looma ogolaan doono aagga imtixaanka. **Xasuuwnoow:** In lagu taliyo inaan boorsooyinka gacanta loo soo qaadan xarunta imtixaanka. Laguuma ogolaan doono boorsooyinka gacanta laguuma ogolaan doono inta imtixaanku socdo.
- Nasashada Musqulgelista**
 - Haddii aad ka baxdo qolka imtixaanka iyadoo imtixaan socdo, waa inaad buugga liiska ku sii qortaa inaad baxday/soo gashay, waxaanad waayi doonto waqti aad maqnayd.
 - Intaad nasaashadan musqusha ku maqan tahay ma heli doonto alaabooyinka ku khaaska ah.
 - Laguuma ogola inaad isticmaasho wax aalado elegtarooni ah ama taleefano intaad nasashada ku jirto.
- Booqdayaasha**
 - Wax marti, booqdayaal, carruur ama xubno qoys ah lagama ogola xarunta imtixaanka.
- Dhaqan xumo ama dabeecad arbush ah**
 - Haddii aad ku kacdo wax dhaqan xumo ama arbushaad ah, imtixaanka waa lagaa joojin doonaa. Haddii imtixaanka lagaa joojiyo, natiijooyinkaagii imtixaanku waxba kama jiraan bay noqon doonaan, tafaasiisha dhaqan xumanadana waxa loo gudbin doonaa Golaha Kalkaalisooyinka. Tusaalayaasha dhaqan xumada waxa ka mid ah inaad cid caawiso ama caawimo hesho, **taleefano xarunta imtixaanka ka dhacaya, dadka macmiilka metelaya oo hadla**, inaad ishaaro bixiso ama dhaqaaqdo iyadoon lagu amrin, inaad qof kale iska dhigto, inaad waraaqaha iyo waxyaabaha imtixaanka kala baxdo qolka imtixaanka, isticmaalka luuqad anshax darro ah iyo dabeecadaha daahinaya ama kala-goynaya imtixaanka.
- Hubka**
 - Hubka lagama ogola xarunta imtixaanka.



Muhiim Markasta oo aad soo gasho qolka imtixaanka, waxa lagaa dalban doonaa inaad jeebabka soo geddiso si aad u xaqiijiso in aadan wadan wax mamnuuc ah. Maamulaha xarunta imtixaanka ayaa kaa uruurin doona shay kasta oo ka hor imanaya shuruucda.

Natiijoyinka Imtixaankaaga

Natiijoyinkaaga waxa loo gudbin doonaa DOH iyada oo aan loo eegayn inaad ku guulaysatay labada qaybood ee imtixaanka iyo haddii kaleba.

Imtixaanka aqoonta

Maadaama aad imtixaanka ku galayso kombiyuutar, ogeysiiska dhammeystirka imtixaanka ayaa shaashadda ka muuqan doonta. Macluumaad dheeraad ah oo ku saabsan sida aad u helayso warbixinta dhibcaha imtixaankaaga ama tallaabooyinka xiga ayaa intaas ka dib iimayl laguugu soo diri doonaa.

Shaqalaah goobta imtixaanka looma ogola inay kaala sheekaysataan sida aad uga shaqaysay imtixaanka.

Si aad ugu gudubto imtixaanka Aqoonta, waa inaad tiro guud oo su'aalo ah saxdaa. Khasab maaha inaad ku gudubto ama ku baasto qayb kasta. Tani waxay suurtoagal ka dhigaysaa inaad ku dhacdo dhowr qaybood oo imtixaanka Aqoonta ah laakiin aad weli natiijo guud oo gudbitaan hesho. Xitaa markaad baasto, waxa si xooggan laguugu dhiirigelinayaa inaad ahmiyad gaar ah siiso goobahaas u baahan fiirida dheeriga ah markaad bilowdo inaad daryeel siiso dadwaynaha.

Imtixaanka xirfadaha

Waxyar ka dib markaad dhammeysato imtixaankaaga Xirfadaha, waxaad iimayl ku heli doontaa Ogeysiis Dhameystireed ay ku qoran yihiin macluumaad ku saabsan sidaad ku heli lahayd warbixinta natiijada imtixaankaagii. Warbixinta natiijada waxa ku qornaan doona xirfad kasta iyo haddii aad ku gudubtay ama ku dhacday. Waa inaad ku gudubtaa dhammaan shan xirfadood si aad ugu gudubto Imtixaanka Xirfadaha. Haddii aadan ku gudbin imtixaankaaga, waxaad heli doontaa macluumaad ku saabsan sidaada imtixaanka dib ugu geli lahayd.

Qiimeeyaha kaa qaadaya Imtixaanka Xirfaadaha sidoo kale looma ogola inuu kaala hadlo natiijoyinkaaga ama heerkaaga waxqabad ee imtixaanka.



Xasuusnoow Natiijoyinku waa qarsoodi oo laguma soo gudbin karo taleefan ahaan.

Wixii su'aalo ama faallooyin ah ee ku saabsan imtixaankaaga waa in Prometric loogu diraa lambarka 800.324.4689.

Su'aalaha xuquuqdoodu dhowrsan tahay. Dhammaan su'aalaha imtixaanka waa hanti ay leedahay Waaxda Caafimaadka ee Gobolka Washington xuquuqdooduna way dhowran tahay. Sharciga dowladda dhexe ayaa jidaynaya ganaaxyo madani ah iyo kuwa dambiyeed lagu soo rogay dib u soo saarista, sii qaybinta, ama soo bandhigista waxyaabo xuquuqdoodu ilaashan tahay idan la'aan.

Nidaamka Racfaanada

Hadafkeenu waa inaanu imtixaan tayo leh iyo xaalado imtixaan oo fiican siino tartame kasta. Haddii aadan ku qancin laba midkood oo aad rumaysan tahay inaad sixi karto dhibaataada, waxaanu jeclaan lahayn inaanu war kaa maqalno. Waxa aanu bixinaynaa fursad aad ku bixin karto faallo guud ka dib markaad dhammeyso imtixaankaaga. Faallooyinka waxa fiirin doona shaqaalaheena, laakiin ma heli doontid jawaab toos ah.

Haddii aad jeclaan lahayd inaad gudbiso racfaan khuseeya xogta imtixaanka, diiwaangelinta, ballan qabashada ama bixinta imtixaanka (habraacyada goobta imtixaanka, qalabka, shaqaalaha, iwm.), fadlan soo gudbi racfaan adigoo booqanaya <https://www.prometric.com/contact-us>

Guddida Racfaanka ayaa qiimeyn doona walaacaaga oo jawaab kuugu soo diri doonta 20 maalmo ganacsiyeed gudahood ka dib marka la helo.